

**AMARADDA SHARCIGA AH IYO IDAARIGA
XEER GOLAHA SARE EE KACAANKA**

XEER Lamb. 38 ee 24 Febarayo 1970

Laalista Dastuurka

GOLAHA SARE EE KACAANKA

Kadib markii la arkay Baaqa Kowaad ee Kaacanka.

Kadib markii la garoowsaday in si loo hirgeliyo ahmiyadda Kaacanka in loo baahan yahay in la buriyo Dasturka Jamhuuriyadda Somaliya.

Kadib markii la arkay qod. 2 ee sharciga 21 Oktoobar 1969.

WUXUU CADDAYNAYAA

Waxaa isla waqtigaan la joogo la buriyey Dasturka Jamhuuriyadda Somaliya. Howlaha sharci dejinta, kuwa fulinta iyo midka gaarsoorka waxaa la wareegay xubnaha ku tilmaaman Baaqa Kowaad ee Kacaanka, shuruucda iyo dekreetoyinka ay soo saari doono Golaha Sare ee Kacaanka.

Muqdisho, 24 Febaraayo 1970.

Madaxweynaha

Golaha Sare ee Kacaanka

SG Mohamed Siyaad Barre

Xoghayaha Dowladda ee Garsoorka, Arrimaha Diinta iyo Shaqada

Dr. Osman Nur Ali